



# Fiisooyinka Lammaanaha iyo Qalalaasaha Qoyska

Dadka heysta fiisaha lammaanaha uma baahna inay baaqi ku ahaadaan xiriir waxyelo leh si ay Australiya u joogaan.

Australiya gudaheeda, qalalaasaha qoyska iyo guriga lama aqbalayo.

Lammaane, xubnaha qoyska ama dadka kale ee bulshada uma hanjabi karaan xaalada fiisahaaga.

Haddii aad heysato fiisaha Lammaanaha Ku meelgaarka ah (subclass , 309 ama 820) ama fiisaha Guurka aad fileyso (subclass 300) oo aad dhibane ka tahay qalalaaso qoys iyo xiriirkaagu dhammaaday, waxaa jira waxyaalo uu bixinayo sharciga socdaalka Australiya oo kuu oggolaanaya inaad sii wadato fiisahaaga Lammaanaha ee joogtada ah ee codsiga (subclass 100 ama 801).

Haddii adiga ama qof aad taqaano uu khatar ku jiro ka wac boliiska **000**.

Booliiska Australia waa ammaan waana lagu kalsoonaan karaa.

Wixii ah macluumaad iyo tallo bixin qarsoon oo bilaasha wac **1800RESPECT 1800 737 732**.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan bilaash ah wac **131 450**.

## Dawlada Australiya (Australian Government) uma dulqaadato qalalaasaha qoyska iyo guriga xaalad walba ha ahaatee.

Qalalaasaha qoyska iyo gurigu waa dembi ka soo horjeeda sharciga. Qofka gala qalalaasaha qoyska ama guriga wuxuu geli karaa xabsi, haddii aad tahay nin ama naag.

Qalalaasaha qoyska iyo gurigu waa dabeecad ama hanjabaad u qasdeysa inay xukunto lammaanaha isagoo sababaya u cabsashada ammaanka ama fiyoobaanta.

## Qofkii ay heysato qalalaase qoys ama guri Australiya gudaheeda wuxuu ka heli karaa caawimaad adeegyada taageerada.

Waxaad heli kartaa caawimaad iyadoon loo eegaynin fiisahaaga ama socdaalkaagu siduu yahay.

Micne maleh haddii xiriirku uu dhammaaday iyo haddii kaleba - weli waxaad heli kartaa caawimaad.

**1800RESPECT** waa adeega qaranka ee kala talinta xadgudubyada galmada, qalalaasha qoyska iyo guriga (Australia's national sexual assault, family and domestic violence counselling service). Waxay bixisaa macluumaad iyo la talin online ka ah iyo taleefanka ah oo qarsoon bilaashna ah. La-taliyayaashu way ku dhageysan doonaan, kana jawaabi doonaan su'aalaha, waxayna kuu gudbin karaan adeegyada taageero ee kale kuna yaal xaafadaada.

Ka wac **1800 737 732** ama kagal website ka **1800RESPECT** ah **www.1800RESPECT.org.au**.

## Ma u baahan tahay turjumaan?

Ka wac **Translating and Interpreting Service (TIS) 131 450**. Turjumaan ka socda TIS ayaa kaa caawin kara inaad la hadashid adeegyada kale, si kastaba ha ahaatee TIS ma bixiso la talin. Dhammaan wacitaanadu waa bilaash qarsoon oo gaar ah.

## Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan qalalaasaha qoyska haddii aad heysato fiise:

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan qalalaasaha qoyska iyo fiisaha wuxuu ku yaal **website** ka Wasaaradda **Arimaha Gudaha** ee (**Department of Home Affairs**) **www.homeaffairs.gov.au**.